# Khabiirada oo Khibrada leh

## Khibrada dhalmada ee hooyo Suuriyaan ah ayaa dib u dejin lagu sameeyay iyada oo hoos imaaneyso Kafaalada Bulshada

Akhri wareysiga oo aan la yeelanay Mirvat, taas oo si bareer ah uga hadlaysa khibradeeda ee cunug inaad ku dhasho UK iyo sida ay uga duwan tahay inaad cunug ku dhasho Suuriya iyo Lubanaan.

Cunug ku dhalidda wadan aadan aqoon u laheen nidaamyada iyo qaababka, meeshaas oo aadan ku hadleynin luuqadda iyo meeshaas oo saaxiibo kugu dhoween adiga iyo qooys waxa waaye khibrad ku adag qooys walba. Mirvat ayaa nala fadhiisatay si ay uga hadasho khibradeeda ee umusha ee UK, sida leesku barbardhigaayo ku dhalidda carruurta ee gudaha Suuriya iyo Lubnaan iyo sida kooxda Kafaalada Bulshada ee Chulmleigh, Devon, ay ku taageertay hawsha oo dhan.

***Imisaa ayaad joogtay UK goortaad aad ogaatay inaad uur leedahay?***

Waxaan joogay UK in muddo ah Saddex bilood. Waxaan imaaday halkaan Abriil 2021 iyo Luulyo waan ogaa inaan uur leeyahay.
Markaan ogaaday aad ayaan u faraxsanaa, dhammaan qoyska way faraxsanaayeen; ninkeyga, carruurteyda, qof walba wuu faraxsanaa.

***Waxay aheed woqti yar oo qurux badan. Wax walaacyo ah miyaad qabtay markaad ogaatay?***

Bilowgiiba waan welwelay sababtoo ah luuqadda halkaan kuma hadlo. Tusaale ahaan, waxaan ka welwelay sida aan ku heli lahaa ballamaha isbitaalka ama ballamaha caafimaadka kala duwan ee la xariira uurka. Laakiin kooxda dhinaceyga kama tagin. Marwalba way ila joogeen. Waxaan yeelan jirnay ballamo 15 ilaa 20 maalmood mar, haddii ay noqoto isbitaalka ama umulisada. Sidaas awgeed, kooxda way igeen jireen wayna isoo qaadaayeen marka ninkeyga uusan heysanin gaariga. Oo markii ninkeyga gaari yeeshay, waxaan bilaabay inaan nafteyda aado, laakiin qudheyda waxaan aaday hal mar oo mana fahmi karin waxay dhahaayaan. Sidaas darteeda, kooxda waxay bilaabeen inay igala soo qaybgalaan si ay ii caawiyaan oo ay u hubiyaan inaan fahmo waxwalba.

***Isbitaalka miyay kuu keeneen turjumaan?***

Isbitaalka waxay qadka taleefoonka isoo geliyeen turjumaan lakiin bilowgii waxaan ku rafaaday inaan fahmo lahjadaha kala duwan ee tujumaanyada, sababtoo ah waxaan leenahay lahjado kala duwan oo Carabi ah. Waxaan weydiinaayay ayaga inay ku soo celiyaan isla jumladii marar badan si aan u fahmo aniga oo kadib waxaan weydiiyay ayaga inay ikeenaan turjumaan kaas oo ku hadlaya lahjadeyda.

***Miyaad dareenaty in lagu siiyay taageero kugu filan goorta aad aaday ballamaha?***

Haa. La xariira xaga dhalmada, markaan aaday isbitaalka, waxay iweydiiyeen haddii aan rabo inaan dhalmo dabiici ah ama dhalmo qaliin ah laigu sameynaayo. Waxaan dhahay sida caadiga ah waxaa laigu

sameeyaa qaliinka. Waxay ii sheegeen taariikhda la joogo; waxay xisaabiyeen iyada usbuucyo, ma ahan bilo taas oo ah waxa ay ka qabtaan dalkeyga hooyo. Maryan [Hogaamiyaha Kooxda] ayaa ila jirtay markii la dejinaaye taariikhda kama danbeysta ah. Waxaan awooday inaan ka qaybgalo fasaladeyda ESOL ilaa iyo lix bilood ee uurka ah, ka dib waan aan joojiyay.

***Waan ogahay inaad haysatid labo carruur oo da'weyn oo aad ku haysatid meel ka baxsan UK. Maxay la mid tahay inaad carruur ku dhasho UK gudaheeda marka leesku barbardhigo carruurta lagu dhalo Lubanaan iyo Suuriya?***

UK gudaheeda, bil kasta waxaa laiga qaadi jiray baaritaanada dhiiga iyo baaritaannada kaadida ah. Marwlaba waxaaan la yaabi jiray sababta ay u sameynayaan sidaas sababtoo Lubanaan iyo Suuriya, haddii aad tagto dhakhtarka, waxuu noqon lahaa dhakhtar gaar loo leeyahay. Oo waxay keliya sameyn doonaan baaritaannada bisha ugu horeysa, oo ka dibna hal bil dhalmada ka hor. Oo haddii aad tagto isbitaalka dadweynaha, ma sameynayaan wax baaritaanno ah sida baaritaannada dhiiga ama wax kasta, ilaa iyo inta aad caafimad qabtid oo aad fiicantahay. Waxay dhihi lahaayeen taasi uma baahnid. Iyadoo halkaan ay sii wadayaan sameynta oo xitaa waxaan la yaabanaan jiray sababta ay u sii wadayaan sameynta bil walba. Oo waxay dhahaayaan keli waxaan rabnaa inaan hubino adi iyo cunuga inaad fiicantihiin.

***Ma jiraan wax farqi ah oo u dhaxeeya umulisada halkaan iyo kuwii kale oo aad horay u soo martay?***

Suuriya, waxaad leedahay umuliso laakiin inta badan waxaa loogu talagalay dhalmada. Uma aadeysid umulisada inay ku hubiso ama ay sameyso baatitaan ama wax kasta, waxaa keliya loogu talagalay dhalmada. Oo weligeyga umuliso hore uma yeelanin. Sidoo kale, umulisada waxay ii sameysay baaritaanno dheeraad ah markii aan ogaa in qaliin laigu sameynaayo. Waxay dhahday ‘waxaan kuu sameyn doonaa baaritaan si loo ogaado haddii aado qabto wax isfekshin ah.’ Oo taasna aad ayay iigu wanaagsaneed aniga; kuma haysano taasi ee gudaha Suuriya, kuma sameeyaan halkaas baaritaanno sidaas oo kale ah.

***Sidee aheed khibradaada ee isbitaalka iyo qaybta dhalmada halkaan?***

Bilawgiiba, maadaamaa turjumaadda ay aheed qadka taleefoonka, ma isticmaali jirin, oo wax yar waan ka yara welwelay. Laakiin tartartiib ayaan ula qabsaday. Sidoo kale, isbitaalka waxay i siiyeen suuxiye kaas oo u dhashay Egypty oo waxuu bilaabay inuu igula hadlo aniga Carabi oo waxuuna ii sharxaayey waxyaabo aniga, taas oo wax yar ii xaqiijiyay aniga. Wuxuu igu yiri ‘Haddii aad u baahan tahay wax kasta aniga iisheeg oo waan kuu sharxi doonaa’, sidaas awgeed waxay ii aheed inuu ii xaqiijiyo aniga.

Mid ka mid ah waxyaabaha igu wanaagsanaa sioo kale wuxuu ahaa waxay u oggolaaneyaan ninka inuu qolka dhalmada kula joogo, taas oo ah Lubanaan gudaheeda iyo Suuriya kuuma oggolaanayaan taasi inaad sameyso adiga. Inuu ila joogo ninkeyga qolka ayaa ii ah qalbi qaboojin aniga sababtoo ah ila ma joogto walaasheyda ama hooyaday halkaan, laakiin inuu ila joogo isaga qolka dhaxdiisa isla doceysaneyno, tani waxay iga caawisay inaan dareemo fiicnaan. Ma joogaayo mudda dheer isbitaalka gudahiisa. Waxaan dhalay cunuga Jimcaha oo waxaan awooday inaan baxdo Axadda. Tani waxay ka

duwan tahay khibradeydii hore, sida Suuriya waxay keliya kuu oggolyihiin inaad joogto 12 saacadood oo ka dib waa inaad baxdaa. Haddii aadan wax xanuun ah ku haynin way ku bixineyaan, laakiin way iska cadahay haddii aad xanuun ama dhibaato waxay kugu haynayaan mudda dheer.

Kooxda waxay naga caawisay waxwalba, gebi ahaanba managa tagayaan anaga. Oo xitaa ilaa iyo hadda wayna caawiyaan aniga haddii ay na haysato wax arrin ah dugsiyada, Xarunta Shaqada, ama haddii qof anaga naga mid ah oo aan fiicnayn, waxay naga caawiyaan dhammaan meel kasta. way na caawiyaan wax badan.

***Oo sidee adiga iyo cunuga hadda aad tihiin?***

Waan fiicannahay. Way ooydaa wax badan! Sidoo kale, waxaa jira saaxiibada ninkeyga, waxaa laga yaabaa inay jiraan lix ama toddobo qooysas kuwaas oo imaadeen halkaan anaga gidaasheena. Oo waxay iweydinaayeen uurka iyo foosha halkaan sababtoo ah ayaga nafsadooda waxay ka welweleen caqabadda luuqadda iyo sida ay ula dhaqmi lahaayee iyada. Oo anigana waxaan kula taliyay inay runtii aad u fududahay oo halkaana ay fududahay.

Mid ka mid haweenka taas oo mardhow dhali rabto cunuga, waxay marwalba igu dhaheysay aniga, ‘waad ogtahay, waxay qaadaan baaritaanno dhiiga ah, marwalba waxay iweydiinayaan inaan la kulmo umulisada’. Marka waxaan ku dhahay taasi waa caadi. Waxa weeyaan keliya in la hubiyo adiga iyo cunugga inaad fiicantihiin. Waxaa jira dad badan kuwaas oo ka welwelsan inay ilmo halkaan ku dhalaan.

***Miyay jiraan waxyaabo aadan kaseynin aad rajeyneyso inaad ogaato?***

Waxaa halkaan lagu yaqaanaa in dadka sida caadiga ah woqtigooda ku imaadaan, laakiin marka ay timaado ballamaha isbitaalka way ka duwan tahay. Waxay soo diri doonaan warqad oo dhahaayaan waxaan u baahannahay inaan halkaas joogo 3-da galanimo oo sidaas darteeda waxaan tagi lahaa halkaas ee 3-da galabnimo laakiin ka dib waxaa la ii yeeri doonaa 4-ta galabnimo! Laakiin haddii aad tahay qofka soo daahay oo aad dhihi lahayd, tusaale ahaan, in wadada mashquul ahayd ama wax inuu dhacay, waxay dhihi lahaayeen ‘alla maya, waad soo daahday, maxaad u soo daahday?’

Waxa kale oo aan soo xasuustay - caadiyan marka dadka ay dhalaan ilmo Suuriya gudaheda, waxay ku siineyaan warqadda daawada oo weyn oo ka buuxa khalajiyaal. Xitaa haddii aadan qabin isfekshin, waxay kuu qori doonaan liis weyn oo daawo ah taasi oo ah waa inaad qaadataa. Iyadoo halkaan aan la sameyneynin wax sidaas ah oo waan yaabay marka oo ay ii qoreynin wax daawo ah. Waxay dhaheen haddii i haayo xanuun waa inaan barastamool - sidaas darteeda waa mid ka mid ah kala duwanaanshah.

Farqiga kale ee ka jira Suuriya gudaheeda waxa waaye gumaarjeexidda ama qaliinka, waxay kaa codsaneyaan inaadan dhaqan 10 maalmood sababtoo ah waxay dhahaayaan waxaa jira oo halis uga jirtaa isfeksha. Markaan halkaan joogay, umulisada waxay iga codsatay 24 saacadood ka dib inaan tago oo aan soo qubeysto oo waxaan ahaa sida, ‘Inaan qubeysan karin!!’ Laakiin halkaan waxaa la ii sheegay inaan qubeysto labo mar maalintiiba. Waan xasuustaa gabadhayda koowaad iigu horeysay ee Suuriya gudaheeda, waxaan dareemaaye inaan ahayn nadiif. Waxaan ku dhahaa hooyadeey waxaan dareemay inaan madaxa injir ka qabo oo waxay igu dhahday aniga, ‘uga yaraan dhaq timahaaga markaas!’.

Dhakhtarka halkaan joogo waxuu ii qoray aniga jeel qubeys ah oo loogu talagalay dhaawaceyga. Islamarkiiba toos ayaan u qubetstay oo waxaan dareemay inay taasi aad ugu wanaagsan tahay inaan haysto liiska qalajiyaha!

Iyo sidoo kale, dhalmada ka dib umulisada way isoo booqon jirtay saddex maalmood kasta si ay u hubiso cunugga iyo cagaarshowka. Ma qabno adeeg sidaas oo kale ee Suuriya gudaheeda. Waxay qaadeyaan dhirirka iyo miisaanka ee cunugga oo waxay arkeyaan markale sagaal bilood ka dib, oo ka dib booqadaha caafimaadka ayaa qaadan doona intaa ka dib.

***Miyaa jira wax kale aad jeclaan laheed inaad dhahdo oo ku saabsan khibradda dhalmada?***

Waxaan jeclaan lahaa inaan ku daro haddii aan rabo inaan ku dhalo cunug kale halkaan, ka dib waxaan jeclaan lahaa inaan doorbido turjumaan haween ah sababtoo ah waxaa jira waxyaabo qaarkooda aan dareemaayo xishood inaan la xaajooda tujumaan raga ah. Ma codsan weligeyga turjumaan haween ah, laakiin waxaan dareemaaye ceeb aad ah waxyaabo inaan kala xaajooda isaga. Ama xiliga xiga haddii aan rabo inaa dhalo cunug, waxaan ku hadli doonaa luuqadda sidaas darteeda uma baahanaayo wax turjumaan ah gebi ahaanba.

*Aad ayaad u mahadsantahay, Mirvat!*

**Maryan oo hogaamineysa kooxda, ayaa ku dartay:**

*Waxaan u maleynaa runtii inay tan si fiican u shaqeyneyso in hal qof laga dhigo meesha tixraaca ah inta lagu jiro muddada uurka ah halkii ay dad badan ku lug yeelan lahaayeen. Runtii taasi si fiican ayay u shqaeysay kiiskeena. Oo ma qiyaasi karo sida ay farxad u leedahay. Qosalka uga horeeya ee caloosheyda waxa uu ahaa imarkii aan helay sawirka baaritaanka uurka markaan maqnaa - taasi waxay ahayd wax si cah ah oo wanaagsan! Oo waxaan u maleeyay, 'allaa, waxaa ku dhacay iyada COVID'. Sidoo kale, marka loo eego ee carruurta, sababtoo ah aad bay uga lqaybqaateen wadada oo dhan, waxay aad u ogaayeen goor hore waxa dhacaayo. Waxaan joognay guriga oo waxaan ku qurxinay guriga buufino, markaaseey u akeed dabaaldeg weyn. Waxaan ka qaybqaadanay dugsiga sida uga dhaqsiyaha badan oo dhalatay Tala, carruurta way awodeen inay haystaan muuqaalka WhatsApp-ka xariirka hooyada iyo aabaha iyo cunuga, taas oo ahayd wax cajiib ah. NHS-ta gebi ahaanba waxay ahayd mid cajiib ah. Waxay ahaayeen kuwa soo jawaaba markan aan u baahannahay ballamaha ogeysiis gaaban oo loogu talagalay waxyaabo kala duwan. Waxay ka heleen shaqaalaha dhakhtar ku hadla Carabi si uu u sameeyo tujurmaadda oo dhan, oo gabi ahaanba waxay ahaayeen kuwo qof ku saleysan. Waxayga iigu weynaa wuxuu ahaa, haqayaasin inta farxad iyo madaddaalo ee aad yeelan doonto!*